



Somaliska

# KU SOO BIIR!

## Waa maxay Urur ama jaaliyad

Ururka wuxuu ka mid yahay tiirarka ugu muhiimsan ay bulshada ku dhisantahay. Jaaliyad ama urur waa bar kulan oo ay iskugu yimaadaan dad isku fikrado ah. Isbahaysiga ururka wuu ka duwan yahay sida shirkadaha oo kale, mana ahan faaido doon iyo qofna malahan. Ururka micnahiisu waxuu yahay iskaa wax u qabso. Tusaale ahaan waalidka waxaa ay waqtigooda ay wax ugu qabtaan xagga carruurtooda iyagoon mushahar lagusiin. Ururka waxaa kaloo lagu gartaa ay tahay in uu leeyahay, hoggaamiye iyo ka qeeb qaatayaal. Ururka arrintiisana waxaa la hergeliyaa xilliga aad firaaqadda aad haysatid oo aad isku af garataan ka qeyb qaatayaasha ururka. Sababta taas keentay ay tahay in dadka ka tirsan ay u arkaan in uu yahay urur aqoon is waydaarsi ah.

## Sidee baad ugu qeyb qaadan kartaa

Qofkasta wuu ka midnoqon karaa xubin ka tirsan ururka, kana qeyb qaadan karo hawlaha ururka uu sameeyo. Lacagtaas aad bixisayna aad xubin kaga noqoto ururka, waxayna kuu suurto gelinaysa in aad ka qayb gashid shirarka, in aad ka dhiibato ra'igaaga iyo in aad ka qeyb qaadatid go aamada iyo dastuurka uruka u degsan. Ka mid noqoshada ururka aad ayey u fican tahay xaga caafimaadka, waxay kaloo kuu suurto gelinaysaa in aad ku barato dad cusub, iyo dhix galka bulshada wadankaan. Waxaad kaloo fursad u helaysaa in aad ku sii barato luqadda iswiidishka iyo in aad ogaato sida aad wadankan ula qabsan laheed iyo wixii la mid ah.

## Ururada Iswiidan ka jira

Waddankan Iswiiden waxaa ka dhisan in ku dhow 200,000 ururo kala duwan. Dad badan oo wadankan degan mid ka mid ah ururadaas ayey ka tirsan yihiin. Ururada waxay ka furan yihiin, xaafad kastaa, magaal kastaa iyou gobol kastaaba. Haday noqon lahayd ururka xaga kubada cagta, ururka dhaqanka iyo farsamada gacanta. Ururada waxay kaloo ka qeeb qaataan, dhinaca xuquuqda beni aadanka, iyo xisbiyada siyaasadda iyo wixii la mid ah.

## Hadaba sidee ugu biiri kartaa ururada wadanka ka jira!

Dad farabaden ayaa yiraahdo sidee bulshaddan u dhix gaalaa? ama ay u arkaan in ay adag tahay is dhix galka bulshada waddankan Iswiiden kunool. Laakiin hadaad xubin ka noqota mid ka mid ah ururada kala duwan ee wadankan ka jiraa. Waxay kuu suurto gelinaysaa in aad wax ka ogaato bulshada iyo aad wax ugu fahamto dhaqanka iyo nidaamka ay u nool yihiin bulshadda wadankan Iswiiden. Haddaba waxaan kuugala talinayaa in aad la xiriirto xafiska shaqadda (Arbetsförmedlingen) Xafiska shaqada iyo maamulka dagmada (kommunen) oo kuu suurto gelinaysaa in aad la xiriito mid ka mid ah ururadda kala duwan ee wadankan ka dhisan.

Wixii faah faahin dheerad ah nalagasoo xeriir cinwaankan: [www.lansstyrelsen.se/stockholm/vida](http://www.lansstyrelsen.se/stockholm/vida)



EUROPEISKA UNIONEN  
Asyl-, migrations- och  
integrationsfonden

